



Waxaad Xaq Uyeelan kartaa Barnaamijka Supplemental Security Income (SSI)

Miiska ku jira

Waa maxay SSI?	1
Lacag intee dhan ayaad heli kartaa?	1
Sidee ayaad xaq ugu yeelanaysaa adeegga SSI?	2
Sidee ayaad ucodsanaysaa gunooyinka SSI?	2
La Xiriirka Lambarka Bulshada	3

Waa maxay SSI?

Supplemental Security Income (SSI) waa barnaamij heer federal ah kaasoo qarashaad bile ah lagu siiyo dadka danyarta ah iyo kuwa aan wax badan haysan. SSI waxaa loogu talagalay dadka da'doodu tahay 65 ama kasii wayn tahay, iyo sidoo kale dadka da' kasta oo yihiinba, ayna kujiraan carruurta, oo indhoolayaasha ah ama dadka naafada ah.

Si aad uhesho SSI, waxaa qasab kugu ah;

- Inaad jirto da'da 65 ama aad kawayntahay;
- In aad gabi ahaan ama qayb ahaanba aad indho la'dahay; ama
- Aad qabto xaalad caafimaad oo kaahortaagan inaad shaqaysato lana filaayo in xaaladaas jirayso ugu yaraan halsano ama geeri keenayso.

Waxaa jira shuruuc kaladuwan oo udagsan carruurta. Wixii macluumaad dheeri ah, ka akhri *Benefits for Children With Disabilities (Gunooyinka Lasiyo carruurta Naafada ah)* (Publication No. 05-10026-SO).

Lacag intee dhan ayaad heli kartaa?

Qarashka aasaasiga ah ee SSI ay bilkasta bixiso sanadka 2018 waa mid iskumid ah wadanka oodhan. Waana:

- \$750 qofkiiba; ama
- \$1,125 dadka lamaanaha ah.

Qofkasta mahelo isku cadad is le'eg. Waxaad heli kartaa cadad dadka kale kabadan haddii aad kunooshahay gobal lacag kudara qarashaadka SSI ee dawlada federalku bixiso. Waxaad qaadan kartaa lacag dadka qaar kayar haddii adiga ama qoyskaagu heshaan qarashaad kale. Goobta aad kunooshahay iyo cida aad lanooshahay ayaa sidoo kale saamayn kuleh cadadka lacageed ee barnaamijka SSI lagaasiinaayo.

Sidee ayaad xaq ugu yeelanaysaa adeegga SSI?

Dhaqaalahaaga

Dhaqaalaha waxaa kamid ah lacagta kusoo gasha, gunooyinka lagaa siiyo Social Security, lacagahaaga hawl gabka iyo qiimaha waxyaabaha qofkale kusiiyo, sida cunto iyo guri.

Meesha aad kunooshahay waxay saamayn kuleedahay cadadka lacageed ee kusoo galaaya bilkasta walise waad helayso gunooyinka SSI. Gobalada kaladuwan waxay leeyihiin shuruuc kaladuwan.

Waxyaabaha aad leedahay

Waxaad helikartaa gunooyinka SSI ilahaaga dhaqaale (waxyaabaha aad leedahay) aysan kabadnayn \$2,000 qofkiiba ama \$3,000 dadka isqaba ee isla nool. Maxisaabino waxkasta oo aad mulkiyadooda leedahay markaan go'aaminayno inaad helayso gunooyinka SSI. Tusaale, maxisaabino guri aad leedahay haddii aad kunooshahay gurigaas, caadiyana maxisaabino gaarigaaga. Waxaan xisaabinaa lacagta kaashka ah, koontooyinka bangiga, alaabta iibka utaala iyo lacagaha maalgashiga kuugu jira.

Waa qasab inaad tahay muwaadin Maraykan ah

Waa inaad kunooshahay United States ama Northern Mariana Islands si lagu siiyo gunooyinka SSI. Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah, laakiin aad si sharci kudagantahay United States, wali waxaad xaq uyeelan kartaa inaad hesho gunooyinka SSI. Wixii macluumaad dheeri ah, ka akhri *Supplemental Security Income (SSI) ee Noncitizens (dadka aan wadanka udhalan)* (Publication No. 05-11051-SO).

Gunooyinka kale

Si aad uhesho SSI, waxaa qasab ah inaad sidoo kale dalbato gunooyinka kale ee dawlada oo aad xaq uyeelankarto. Haddii

aad hesho gunooyinka SSI, waxaad caadiyan gunooyin kaheli kartaa Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP) iyo Medicaid, sidoo kale. Medicaid waxay kaacaawinaysaa dhiibista biilalka dhakhtarka iyo isbitaalka, adeegga SNAP wuxuu kaacaawinayaa dhiibista qarashaadka cuntada.

Codsiyada gunooyinka SNAP waxaa markasta laga heli karaa xafiiska Social Security xili kasta. Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan barnaamijka caawimaada dhanka quudinta oo aad heli karto, ka akhri *Nutrition Assistance Programs* (Publication No. 05-10100) and *Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP) Facts* (Publication No. 05-10101-SO). Booqo www.fns.usda.gov/snap si aad uhesho macluumaad laxiriira sida aad ucodsanaysa.

Sidee ayaad ucodsanaysaa gunooyinka SSI?

Si aad ucodsato gunooyinka SSI, waad bilaabi kartaa hawsha waxaadna buuxin kartaa qayb wayn oo kamid ah codsigaaga adoo booqanaaya websetkeena oo ah www.socialsecurity.gov/applyforbenefits. Waxaad sidoo kale si lacag la'aan ah noogasoo wici kartaa laynka **1-800-772-1213** si laguugu qabto balan shaqsi ah ama taleefoonka aad kula yeelato wakiil kasocda xaafiiska Social Security ee deegaankaaga.

Waxaad xaq uyeelan kartaa inaad codsigaaga gunooyinka SSI si oonleen ah kubuuxiso haddii:

- Da'daadu udhaxayso 18 iyo 65;
- Aadan waligaa guursan;
- Aadan indhool ahayn;
- Aadna tahay muwaadin Maraykan ah oo dagan mid kamid ah 50 gobal, District of Columbia, ama Northern Mariana Islands;
- Aadana codsan ama aadan helin gunooyinka SSI mar hore; iyo
- Aad codsanayso caymiska Social Security Disability Insurance isla marka aad xaq uyeelato gunooyinka SSI.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan

tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration
Publication No. 05-11069-SO | January 2018
Waxaad Xaq Uyeelan kartaa Barnaamijka Supplemental Security Income (SSI)
You May Be Able to Get Supplemental Security Income (SSI) (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha